Calgary

# Vehicle for Hire




**WARBIXIN # 002**
**TAKSIGA/DIB U CUSBOONAYSIINTA SHATIGA TAARIKADA TAKSIYADA KURSIGA NAAFADA LAGU ISTICMAALI KARO**

**MAAJO 2025**

---

Muddada dib u cusboonaysiinta ee Shatiga Taarikada Taksiga (T.P.L.) iyo Shatiyada Taksiyada Kursiga Naafada Lagu Isticmaali Karo (A.T.P.L.) ee 2025 waxay u dhexaysaa Juun 1 ilaa Juun 30.

Marka aan galno muddadan mashquulka badan, wakhtiyada sugitaanka ee xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire) wuxuu ka badan karaa wakhtigii caadiga ahaa waxaana kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga iyo garowshiyahaaga. Hadda waxaan wadnaa habka dib u cusboonaysiinta onlaynka ah, laakiin hadda, dib u cusboonaysiinta waa in lagu dhammeeyaa si fool-ka-fool ah oo xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire) la imanayo.

Xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire) (2340 – 22 Street N.E.) wuxuu furan yahay saacadaha u dhexeeya 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si shatiyada dib loogu cusboonaysiiyo. Dadka taarigooyinka haysta waxaa la xasuusinayaa in ay la yimaadaan Shatiga darawalnimada ama Shatiga Darawalnimada Taksiga ee Gobolka Alberta oo ansax ah. Kharashka dib u cusboonaysiinta Shatiga Taarikada Taksigu (T.P.L.) waa $495.

Xeer-hoosaadka Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire) waxa uu leeyahay qodobbo khuseeya muhiimadda ay leedahay cusboonaysiinta T.P.L ama A.T.P.L.

*Faqrada 35*

> (1) Haddii *T.P.L.* ama *A.T.P.L.* ay taariikhdiisu dhacdo oo aan codsi dib u cusboonaysiin ah lagu soo gudbin **30 maalmood gudahood marka uu dhaco**, intaas kaddib *T.P.L.* ama *A.T.P.L.* waxaa loo arkayaa mid laga maarmay xaqa qofku u leeyahay inuu dib u cusboonaysiiyana meesha waa laga saarayaa.

Waxa aanu u hanqal taagaynaa in aan ku aragno Juun. Fadlan wixii su’aalo ah noogu soo dir iimaylka VFHlicensing@calgary.ca

Farriintan waxaa loo turjumay Af-amxaari, Af-Carabi, Af-faransiis, Af-hindi, Af-bunjaabi, A-soomaali iyo Af-urduu. Riix halkan si aad u aragto dukumentiyada.

Si ku dheehan daacadnimo,

**Cory Porter**
Ku Xigeenka Madaxa, Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire)
Maaraynta Xaaladaha Deg-dega ah iyo Amniga Bulshadda